

Bostarka Khidmadaha Dugsiga Qoysaska Ardayda ku jirta Darajooyinka K-6



LAMA ogola khidmadaha maalin dugsiiyeedka darajooyinka K-6.*

Ardayga dugsiga hoose laguma soo dallici karo cuntada fudud ee lagu cuno fasalka, wargeysyada, buugaagta, safarada dibadda, alaabta fanka, waxyaabaha leysku rakibo, qalabka muusikada, ama shay kasta oo qeyb ka ah maalin dugsiiyeedka caadiga. Waxaa dhici karto in ardayga laga codsado in uu iskiisa u keeno dugsiga alaabta caadiga guriga, balse looma ciqaabi karo haddii uu keeni waayo alaabta.

**Waxaa dhici karto in khidmad lagu soo dallaco ardayda ku jirta darajada lexaad haddii ardayga tago dugsi ay wax ka bartaan darajooyinka 7-12 keliya iyo dugsiga raaco habka dugsiga sare iyo waxbarasho la siiyo ardayda darajada lexaad.*

Khidmadaha dugsiga waxaa la soo dallici karaa oo KELIYA marka ay jiraan hawlaha laga fulliyo dugsiga ka hor iyo kaddibma inta ay socdaan fasaxyada dugsiga.

DHAMAAN KHIDMADAHA DUGSIGA WAXAY HOOS YIMAADAAN KA-DHAAFID.

YAA XAQ U LEH KA DHAARO KHIDMADAHA?

Waxaa dhici karto in ardayga uu xaq u yeesho in laga dhaaro khidmadaha haddii MID ka mid ah kuwa soo socdo lagu dabaqo:*

- marka qoyska ardayga qaato TANF/Snap (*kuboonka raashinka ama Brograamka Shaqada Qoyska Gobolka (State Family Employment Program)(Supplemental Nutrition Assistance Program)*)
- marka ardayga qaato SSI (*Dakhliga Sekuritiga Dheeraadka (Supplemental Security Income)*)
- ardayga ayaa loo qoondeeyay McKinney-Vento
- marka ardayga ku jiro daryeelka qof kale
- marka ardayga ku jiro xabsiga gobolka
- marka ardayga uu xaq u yeesho taasoo ku saleysan dakhliga qoyska/reerka (*heerarka waafaqsan yahiin xaq u yeelashada qadada lacag la'aanta*)

**Ardayga wuxuu kaloo xaq u yeelan karaa ka-dhaafidda khidmadda haddii uusan la kulmin mid ka mid ah heerarkan balse uusan weli bixin karin khidmadda. Fadlan tag dugsiga ama fiir siyaasadda dagmada si aad u heshid macluumaad badan.*

SIDEEN KU DALBAN KARNAA KA-DHAAFIDDA KHIDMADA?

Ardayga ama waalidka ayaa dalban kara ka-dhaafidda khidmadaha:

- marka ay buuxiyaan arjiga ka-dhaafidda khidmadda
- marka ay dugsiga u gudbiyaan arji buuxa
- marka ay keenaan warqadaha xaq u yeelashada ka-dhaafidda khidmadaha (*Fiiri Arjiga Ka-Dhaafidda Khidmadda*) si aad u heshid warqadaha loo baahan yahay)

Sharrciga gobolka wuxuu rabaa in dugsiyada ay xaqiijiyaan xaq u yeelashada ka-dhaafidda khidmadda. Dugsiga wuxuu diiwaanka gelin doonaa warqadaha xaq u yeelashada soo gaaray iyo haddii ay la kulmaan sharuudaha xaq u yeelashada kaddibna ardayga waxaa loo dirri doonaa foomka Go'aanka iyo Racfaanka (Decision and Appeals form). Kaddib marka la diiwaan geliyo, koobiyada warqadaha xaq u yeelashada laguma hayn doono faylka dugsiga.

SIDEE AYAY KA-DHAAFIDDA U SAAMAYN DOONTAA KA-QEYBGALKA ARDAYGA HAWLAHA DUGSIGA?

Haddii ardayga uu xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda, **waa in laga dhaaro DHAMAAN khidmadaha.**

Haddii ardayga uu xaq u yeesho ka-dhaafidda khidmadda, dugsiga kama rabo ardaygaas in uu shaqeyo baddalkii uu qaadan lahaa ka-dhaafidda, ama weydiisan lahaa in uu kis-kis u bixiyo khidmadda.

Lama ogola in dugsiga aruuriyo lacag, yareeyo, ama la haro darajooyinka, ama reebto shahaadooyinka, diiwaanada dugsiga, jadwalada fasalka ama ka-qeybgalka inta uu socdo maalin dugsiiyeedka caadiga si loo hirgeliyo bixinta kharashka dugsiga.

Si aad u ogaatid in badan, la xariir dugsiga ardaygaada, booqo bogga internetka dugsigaada, ama booqo bogga internetka khidmadaha dugsiga gobolka (<https://schools.utah.gov/schoolfees>).

Su'aalaha, Faalada, ama Arrimaha? La xariir kooxda khidmadaha dugsiga gobolka schoolfees@schools.utah.gov.



Utah State Board of Education School Fees Team

Revised February 2023
ADA Compliant 2/14/2023